GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES




# Warbixinta

## Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 42aad iyo Kal-fadhiyo aan caadi ahayn

*(From 15 February 2020 to 10 March 2020)*

***July 2020***

*Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL*

***Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 42aad***

| No | Kal-fadhiga | Taariikhda uu furmay | Taariikhda uu xidhmay |
|---|---|---|---|
| 1. | 41aad | 15/02/2020 | 10/03/2019 |

Mudanayaal,

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhiga 42aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore oo aynu wakhti yar ka shaqeynay Xanuunkiin Dunida saameeyay ee Covid19 dartiisa, mudona fasax ku maqnayan. Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena Qaran iyo hawlaha badan ee inoo yaal darteed waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 41aad iyo Kala-fadhiyadii aan caadi aheyn ee qabsoomay iyo wixii kale ee hawlo ah ama soo kordhay mudaddaas.

## Warbixinada Golaha laga hor akhirayay

| Tar. | Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 22/02/2020 | Warbixinta Shirgudoonka | Mr. Cabdirisaaq Siciid Ayaanle |
| 22/02/2020 | Warbixinta Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada | Md. Axmed Ducaale Bulaale<br>Gudoomiyahe Xigeenka Guddida Joogtada iyo Anshaxa |
| 15/03/2020 | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerka ka-hortaga Mukhaadaraadka | Md. C/laahi Xusen Cige<br>Gudoomiyaha Gudidda |

## Xeerarka uu Goluhu Ansixiyay.

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka | 22/02/2020 | Golaha Guurtida |
| 2. | Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Isgaadhsiinta | 07/02/2020 | Madaxweynaha |

## Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay

### B. Xubnaha Gudidda Agaasinka Boodhka

| No | Magaca | Xilka Masuulka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Maxamed Cabdi Ibraahim | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |
| 2. | Md. Xuseen C/laahi Jaamac | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |
| 3. | Md. Maxamed Sh. Xasan Taani | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |
| 4. | Md. Maxamuud Cawil Ibraahim | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |
| 5. | Md. Cismaan Shiikh Axmed | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |
| 6. | Md. Axmed Cali Qaasaali | Xubin Gudidda Agaasinka Baanka Dhexe | 09/03/2020 |

### T. Ansixinta Wasiirada Xukuumada

| No | Magaca | Xilka Masuulka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Siciid Sulub Maxamed | Wasiirka Xanaanadda Xoolaha | 09/03/2020 |
| 2. | Md. Axmed Maxamed Diiriye | Wasiirka Waxbarashada iyo Sayniska | 09/03/2020 |
| 3. | Md. Mustafe Maxamuud Cali Bille | Wasiirka Cadaaladda | 09/03/2020 |
| 4. | Md. Mahdi C/laahi Cismaan | Wasiir ku-xigeenka H. Caafimaad | 09/03/2020 |
| 5. | Md. Yuusuf Ibraahim - | Wasiir ku-xigeenka H. Maaliyada | 09/03/2020 |

### J. Laba Xubnood oo Komishanka Doorashooyinka ka tirsan

**28 March 2020** Golaha wakiiladu Kal-fadhi aan Caadi ahayn oo uu yeeshay wuxuu ugu codeeyay laba Xubnood oo ka tirsan Komishanka Doorashooyinka Qaranka kuwaas oo ay soo xuleen labada xisbi ee Mucaaridka ah (Waddani iyo UCID) Fadhigaas oo uu Gudoominayay Gudoomiyaha Golaha Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa Waxa ka soo Xaadiray 51 Xildhibaan. Ugu horeyn waxa Cv-yada labada xubnood ka akhriyey Xoghayaha guud Mr Cabdirisaaq Siciid Ayaanle. Intaas ka dibna waxa loo codeeyay labadaas xubnood oo labaduba helay kalsoonidii Golaha Wakiilada sidaasna ku ansaxay kana mid noqday 7da xubnood eeKomishanka Doorashooyinka Qaranka oo Goluhu 5ta xubnood ee kale hore u ansixiyay.

| No | Magaca | Xilka Masuulka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Mr. Cabdifatax Ibrahim Hassan | Xubin Komishanka Doorashooyinka | 28/06/2020 |
| 2. | Mr. Maxamuud Siciid Dalmar | Xubin Komishanka Doorashooyinka | 28/06/2020 |

## Mooshinadii Golaha la horkeenay.

Intii lagu jiray kal-fadhigii 42aad ee Golaha Wakiilada, waxa la horkeenay laba Mooshin oo kala duwan kuwaas oo labaduba ku saabsanaayeen wax ka badal iyo Kaabis lagu sameynayay laba Xeer. Hadaba, labadan Xeer ee wax ka badalkooda Mooshinka lagu soo jeediyay waxay kala ahaayeen Xeerka Isgaadhsiinta Somaliland Xeer Lr. 50/2011 iyo Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada Xeer Lr. 20A/2005 kaas oo wax ka badal loogus sameynayay si loo soo buuxiyo laba Xubnood oo Golaha ka dhiman.

Labadan Mooshin oo labudaba Goluhu Ansixiya waxa la kala keenay **29 February 2020** Waxa la keenay Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada, halka **07 March 2020** la keenay isla markaana laga ansixiyay Mooshinka wax ka badalka Xeerka Isgaadhsiinta Somaliland.

## Fadhigii wada-jirka Laba Gole ee Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha

**18 March 2020** ayay labada Gole ee Baarlamaanku (Guurtida iyo Wakiilada) Fadhi Wada-jir ah ku dhageysteen Khudbad sanadeedkii Madaxweynaha Fadhigaas oo lagu qabtay aqalka Golaha Guurtida, ayuu **Madaxweynaha JSL Md. Muuse Biixi Cabadi** kaga jeediyay Baarlamaanka Qudbad sanadeedkii Dastuuriga ahayd ee Sanada 2020-ka Md. Muuse Biixi Cabdi Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, Qudbadaas oo ka koobnayd ama uu kaga hadlay arrimo badan oo kala ahaa

1. Dhaqaalaha
2. Adeegyada Bulshada
3. Nabad-galyada iyo
4. Arimaha Dibada
5. Doorashooyinka





## Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah

| No | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalaha |
| 2. | Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka | Gudida Deegaanka & Kheyradka Dabiiciga |
| 3. | Wax ka badalka Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta |
| 4. | Xeerka ka hortaga Argagaxisada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 5. | Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud & Diiwaanglainta | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 6. | Xeerka Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 7. | Xeerka Hay'adda Wadooyinka | Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka |
| 8. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 9. | Wax ka badelka Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | Gudidda Arrimaha Gudaha |

## B. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badalka Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo Mudanayasha Baarlamaanka | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |
| 2. | Wax-ka beddelka Xeerka Tamarta | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |
| 3. | Wax ka badalka Xeerka Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |

## T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

## Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.
9. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Nabadsugida iyo Nabadsugida.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iy Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

### Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Hadaba, mudaddii lagu jiray fasaxa Gudiddu sidii caaddaahayd lama kulmin Masuuliyiin Qaran.

**30 June 2020** Gudidda Joogtada ee Goluhu waxay Go'aamo ka soo saartay Gudoomiyaha Xisbiga UCID Md. Faysal Cali Waraabe, ka dib markii Gudoomiyaha UCID hadal uu ka jeediyay Warbaahinta 29 May 2020 uu ku Aflagaadeeyay isla markaana wax ka sheegay Beelo Somaliland ka mid ah iyo Masuuliyiin Qaran oo ay ka mid yihiin Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Md. Baashe Maxamed Faarax iyo Xildhibaano kale. Waxayna sheegtay Gudiddu inuu ku xadgubay oo uu jabiyay Qodobo Dastuuri ah sida Qodobka 93aad (3) iyo Xeerka Ururada iyo Axsaabta Qodobkiisa 2aad (1) oo sheegaya in Uurada iyo Axsaabtu u hogaansamaan dastuurka, Xeerarka kale ee dalka iyo hanaanka dimuqraadiga ah, waana in aanay wax u dhimin midnimada dalka Jamhuuriyada Somaliland iyo Nabadgalyada guud.



Waxay Gudidda Joogtadu soo jeedisay in Gudoomiye Faysal Cali Waraabe uu yahay qof aan qaadi karin Masuuliyad Qaran, khatarna ku ah midnimada iyo Qaranimada Somaliland, sidaa darteed, in laga bilaabo hada aan loola dhaqmin loona aqoonsan Gudoomiya xisbi UCID, wax wada shaqeynan aanay la yeelan Golaha Wakiilada, Xukuumada laamaheeda kala duwan iyo hay'addaha caalamiga ah ee inaga caawiya dimuqraadiyada. Sidoo kale waxay Gudidda Ururada iyo Axsaabta siyaaasada ay ka qaado Xasaanada si looga qaado talaabo sharciga waafaqsan maadaama uu baal maray Dastuurka iyo xeerarka kale, ugu dambeyna waxay go'aankeeda ku soo gabo-gabeysay in Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranku ku soo oogo dhamaan damabiyadii ka dhashay hadalkii Faysal Cali Waraabiye ka jeediyay Warbaahinta.

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 42aad ee bishii March 2020 Gudidda Garasoorka iyo Cadaaladdu waxay Golewaynaha u soo gudbisay uga soo talo-bixisay Ansixinta **Wasiirka Wasaarada Cadaalada Md. Mustafe Maxamed Cali Bille** waxayna Golaha u soo jeediyeen in Xilkaas loo ansixiyo

## Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsigu waxay Bishii **March 2020** ay Golewaynaha u soo gudbisay oo ay ka soo talo bixisay Ansixinta lix xubnood oo ah **Gudidda Agaasinka Baniga dhexe ee Somaliland** iyo **Wasiir ku-xigeenka Wasaarada H. Maaliyada Md. Yuusuf Ibraahim** waxayna Golaha u soo jeediyeen in Masuuliyiintaas loo ansixiyo Xilalkaas.

Sidoo kale Gudiddu iyadoo Gudaneysa Waajibaadkeeda Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay waxay Bishii **july 2020** kormeer ku soo martay illlaha Dakhliga ee Dalka iyadoo Gudiddu isu qaybisay laba qaybood, qayb u baxday Gobolada Bariga iyo qayb u baxday Gobolada Galbeedka kormeerkaa soo u jeedadiisu ahaa u kuur galida illaha Dakhliga iyo xogogaal u noqoshada isbadalka korodh iyo hoos u dhac ee jira, saamaynta uu keenay xanuunka **covid_19** iyo inay ka soo xogwareystaan laamaha dakhli ururinta ee Goboladaas sida xaalada dakhli ee kastamada iyo Cashuuraha Barigu yihiin, caqabadaha ka jira, baahiyahooda iyo siday u shaqaynayaan.








Intii ay Gudidda Dhaqaaluhu ku jirtay Safarka Kormerka Illaha Dakhliga waxay la kulan tahay Masuuliyiin isla markaana booqatay Xarumaha shaqooyinku ka socdo waxaana ka mid ahaa:-

- Maamulka Kastamka Dekada Berbera.
- Maamulka Hay'adda Dekadaha Somaliland (SPA)
- Maamulka Haamaha Shidaalka
- Maamulka Kastamka Kala-baydh
- Maamulka Kastamka Goroyo-cawl
- Maamulka Cshuuraha Bariga Boorama
- Maamulka Cashuuraha Bariga Berbera
- Maamulka Wasaarada Maaliyada Gobolka Tog-dheer

Gudiddu waxay safarka kormeerkaas ka diyaarisay Warbixin xambaarsan xogtii ay ka soo heleen Illaha dakhliga dalka iyagoo Warbixintaas ay Golewaynaha la wadaagi doonaan.

## Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah

Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadku intii lagu jiray Kal-fadhigii 42aad ee bishii March 2020 waxay Golewaynaha u soo gudbisay uga soo talo-bixisay Ansixinta **Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Kalluumeysiga Md. Siciid Sulub Maxamed** waxayna Golaha u soo jeediyeen in Xilkaas loo ansixiyo

Sidoo kale, Gudida deegaanka Beeraha iyo Khayraadka Dabiiciga ah waxay **21 June 2020** kulan Xog waran iyo su'aalo waydiin isu jiray la qaadatay Wasiirka Wasaarada Beeraha Mudane Axmed Muumin Seed.




Kulankan oo uu Gudoominayay Gudoomiyaha Gudidaas Md. Maxamed Xaaji Yuusuf (Waabeeyo) ayay Gudidu kaga dhegaysatay xaalada wax soosaarka dalka iyo halka ay Wasaaradu marinayso la dagaalankii Ayaxa oo beryahanba dalka si xoog leh uga dilaacay. Xubnaha Gudida ayaa iyaguna su'aalo furan oo warbaahintu goob joog ka tahay ku waydiiyey Wasiirka kulankaas.

## Guddida Arimaha Bulshad iyo diinta

Gudidda Arimaha Bulshadu waxay Kulankan wadatashiga ah u qabatay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah oo Gudiddaasi gacanta ku hayso, kulan wadatishagan oo Socday laba maalmood ayaa lagu qabtay Hotel Fish and Steak. Kulankan ayaa waxa ka soo qayb galay shirkadaha waaweyn, Ururada iyo hay'aad Dawladeed sida Wasiirka Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Shaqogalinta Marwo Hinda Jaamac Gaani.

Sidoo kale Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadku intii lagu jiray Kal-fadhigii 42aad ee bishii March 2020 waxay Golewaynaha u soo gudbisay uga soo talo-bixisay Ansixinta **Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska Md. Axmed Maxamed Diiriye iyo Wasaiir ku-xigeenka H. Caafimaadka Md**. Md. Mahdi C/laahi Cismaan waxayna Golaha u soo jeediyeen in Xilalkaas loo ansixiyo.

## Guddida Arimaha Gudaha iyo Nabadgelyada

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu intii lagu jiray Kal-fadhigii 42aad waxay Golaha u soo gudbisey wax ka badalka iyo Kaabista xeerka ka hor-taga Mukhaadaraadka oo ka soo shaqeysay, waxayna Golaha ka siisay Warbixin wax ka badal iyo kaabis ay ku soo sameeyeen.

Sido kale Gudidu waxay Golaha uga soo talo-bixisay Ansixinta laba Xunood oo ka tirsan Komishanka Doorashooyinka Qaranka

## Guddida Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

Gudidda Illaalinta iyo Dabagaalka Hantida Qaranku waxay **08 July 2020** kulan la yeelatay Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska kulankaas oo ka dhacey Xafiiska Gudidda waxa Wasaarada ka socday Masuuliyiin uu ugu sareeyo Wasiirka Wasaaradaas Md. Axmed Maxamed Diiriye,, Agaasimaha Guud ee Wasaarada Maxamed Abokor iyo Agaasime Waaxeedyada Maamulka iyo Lacagta iyo Hantida ee Wasaaradaas.

Kulankan oo Gudiddu Wasaarada wax kaga waydiinaysay dhawr arrimood oo kala ahaa

- Siyaasadda ay ku Maamulaan Hantida Jaamacadaha Dawliga ah (Public Universities Properties)
- Hantida Wasaarada ee guurtada iyo ma guurtada iyo warbixinada Xisaab xidhadooda.
- Hubinta lacagihii Miisaaniyada iyo Deeqaha Wasaaradu Hay'addaha ka hesho in sidii loogu talagalay loo maamulay loona kharash-garaeeyay. iyo
- In Dhamaan Hantida Wasaarada loo isticmaalo looguna ilaaliyo sidii loogu talagalayl.



Kulankan oo Wasaaradu Warbixin arrimahaas ku saabsan Gudidda siisay ayay sidoo kale Mudanayaasha Gudiddu su'aalo kala duwan ku waydiisay Wasiirka iyo Saraakiisha Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska.

Sidoo Kale **11 July2020** Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay Safar ku tagtay Gobolka Awdal gaar ahaa Magaalo madaxda Gobolkaas ee Borama, safarkan intii ay Gobolka Awdal Gudiddu ku joogtay waxay kulamo kala duwan la kala yeelatay Muumulka Gobolka iyo Degamda iyo sidoo kale Masuuliyiinta hay'addaha heer Gobol oo kala aha:-

- Badhasaabka Gobolka Awdal Teambaro
- Maayarka Degmada Boorama Mr. Saleebaan
- Isuduwaha Wasaarada Horumarinta Waddooyinka iyo Gaadiidka ee Gobolka Awdal Mr. KulmiyeMaxamed Ciise iyo saraakiisha kale ee la shaqeeya.
- Isuduwaha Wasaarada Hawlaha Guud Mr. Suleymaan Aadan Samatar

## Gudoomiyaha Golaha oo ay Kulan la yeesheen Haween-weynaha Dalka.

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa kulan la qaatay Haween weynaha Dalka iyo Beelaha laga tirada badan yahay, kulankaas oo ujeedadiisua ahayd dalab ay ku doonayeen in Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka lagu ansixiyo Qoondadii haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay, kaas oo Gudoomiyuhu ka aqabalay inay Xeerka Golaha la horgeynayo ku soo daraan.

 

Gudoomiyaha ayaa Haweenka ka balan qaaday in marka Golaha la furo ay xeerka soo hordhigayaan ka shir-gudoon ahaana ay ka go'an tahay inay Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay garab istaagaan sidii loogu ansixin lahaa qoondadaas madaxweynuhu hore ugu soo gooyey. Xubnaha Haweenka oo ay hormood ka ahayd Dalada Haweenka NAGAAD iyo Suldaan Naasir oo beelaha laga tirada badan u hadlayay.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada.**